

XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA CUNTADA FOODSHARE

WAXAA XAQ U LEEDAHAY OGEYSIIS QORAAL AH in aad xafiiska ka hesho ka hor intuuusan dhicin wax ficil ah oo noqonaya joojinta ama yareynta cuntada FoodShare. Ficillada badankooda waxaa laguugu soo dirayaa waraaq ugu yaraan 10 maalmood ka hor intaan ficilka la sameyn.

WAXAAD XAQ U LEEDAHAY:

- In lagu siiyo codsi aad buuxiso iyo in lagaa qabto codsiga isla markiiba.
- Inuu ku caawiyo qof weyn oo xaalkaaga ka warhaya si aad u hesho una maareyso cuntadaada FoodShare.
- Inaad cuntada FoodShare ku hesho 30 maalmood gudahood codsigaaga iyo shuruudaha ka dib.
- Inaad cuntada FoodShare ku hesho 7 maalmood haddii aad u baahato shuruudaha adeegga degdegga ah.
- Inaan lagu takoorin iyadoo ay ugu wacan tahay da', ama jinsi, isir, midab, naafannimo, caqiido diimeed, asalkaagii hore, ama siyaasad aad aaminsan tahay.
- Inaan lagu xadgudbin xuquuqdaada madaniga ah.
- In ay shaqaaluhu shakhsi ahaan kuu ixtiraamaan.
- In xogtaada shakhsiga ah si adag laguugu dhowro.
- Inaad xafiiska weydiisato in lagu sharxo wixii aad fahmi weydo.
- In mar hore lagu soo sheego haddii la yareynayo ama lagaa joojinayo cuntada FoodShare iyo sababta keentay.
- Inaad eegto qoraalka iyo feylasha adiga ku khuseeya, laakiin wax aan ahayn xogaha meelo kale oo qarsoodi ah.
- In koobbi lagaa siiyo sharciyada cuntada FoodShare.
- Inaad codsato dacwad-dhageysi caddaalad ah markaad ku qanci weydo go'aan ay kaa gaareen xafiiska. Dacwad-dhageysiga waa fursad aad ku sheegan karto sababta aad ugu maleyneyso in uu khaldan yahay go'aanka looga soo jawaabay codsigaaga.

WAAJIBAADKA KU SAARAN WAA:

- Inaad si buuxda oo daacadnimo ah uga jawaabto su'aal kasta markaad soo codsaneyso cuntada FoodShare. Inaad magacaaga ku saxiixdo si aad ugu dhaarato in jawaabahaagu run yihiin, iyo in lagugu qaadi karo sharciga dhaarta beenta ah.
- Inaad keento caddeymaha lagu weydiiyo.
- Inaad xafiiska FoodShare u soo sheegto is-beddelka dakhliga wixii ka badan 130% marka loo eego [Heerka Saboolnimada Federaalka](#) (FPL) sida ku qoran waraaqda warbixinta marka ay wakhti ka dib yaraadaan saacadaha shaqada ee qof qoyska ka tirsan cuntadiisa FoodShare 80 bishiiba.
- Inaad waxba ka beddelin kaarka QUEST card ama waraaqaha FoodShare.
- Inaad iibin, ka ganacsan, ama qofna siin cuntadaada FoodShare, waraaqaha, ama kaarka QUEST card.
- Inaad FoodShare ku iibsato wixii loo oggol yahay keliya.

Dadka jebiya sharciyada FoodShare barnaamijka ayaa laga saarayaa, waa la ganaaxayaa, xabsi ayaa la dhigayaa, ama saddexdaasba waa la isugu darayaa.

INAAD DACWAD-DHAGEYSI KA CODSATO FOODSHARE haddii aad ku qanci weydo go'aan uu xafiisku kaa soo gaaray. Waxaad dacwad-dhageysiga ku soo codsan kartaa si qoraal ah, khadka taleefanka, ama inaad timaaddo xafiiska FoodShare. Xafiiska ayaad ka heli kartaa faahfaahin ku saabsan sharciyada dacwad-dhageysiga. Waxa kale oo aad codsan kartaa dacwad-dhageysi adigoo waraaq u soo diraya maamulka waaxda, qeybta dacwad-dhageysiga iyo racfaanka ee Department of Administration, Division of Hearings and Appeals, PO Box 7875, Madison, WI 53707-7875 ama inaad soo garaacdo 608-266-7790. Sida sharcigu dhigayo Wis. Maamulkeeda. Sharciga § HA 3.03, codsigaaga waa in lagu helo 90 maalmood gudahood ka dib marka aad jawaab ka hesho xafiiska codsigaaga cuntada FoodShare, ama mar kasta oo aad qaadato cuntada FoodShare.

Sida ay u badan tahay, haddii codsigaaga Dacwad-dhageysiga Caddaaladda ah ay helaan Division of Hearings and Appeals (Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka) ka hor intuuusan bilaaban go'aan lagaa gaaray, cuntadaada FoodShare is-beddel kuma dhacayo ilaa go'aan laga gaaro racfaankaaga. Inta wakhtigaas lagu jiro, haddii uu dhaco is-beddel kale oo aan la fileyn, FoodShare waa is-beddeli kartaa. Haddii uu is-beddel kale dhaco, waraaq cusub ayaad heleysaa. Haddii aad ku qanci weydo go'aanka dacwad-dhageysiga, waxaad codsan kartaa racfaan dacwad-dhageysi labaad. Haddii uu go'aanka dacwad-dhageysiga kaa joojiyo ama kaa yareeyo cuntada, waxaa dhici karta inaad dib u soo celiso wixii aad qaadatay intii uu racfaanku kuu socday. Adiga ayaa codsan kara in aad iska joojiso cuntada.

ADIGA AYAA NAFTAADA MATALI KARA AMA WAKIIL AYAAD KEENSAN KARTAA dacwad-dhageysiga ama kulanka qareenka, saaxiib ama qofkii aad adigu rabto. Lagaama bixinayo lacagta qareenka aad keensato. Hase yeeshee, haddii aad xaq u yeelato waxaad heli kartaa adeeg ah xagga sharciga oo bilaash ah.

Haddii aad adiga ama wakiilkaagu dacwad-dhageysiga imaan weydaan adinka oo aan haysan cudur-daar dhab ah, racfaankaagu waa dhammaaday oo lama tixgelinayo.

BAARISTA KAMBUYUUTARKA: MANAAFACAAD AMA ADEEG HADDII AAD HESHO, raac sharciyada soo socda: Macluumaadka aad sheegto waxaa lagu xaqiijinayaa barnaamijyo kambuyuutar ah oo ku habboon. Macluumaadka waxa kale oo loo eegayaa sida aad uga soo baxayso sharciyada barnaamijka iyo maamul ahaan. Haddii aad shaqeyso, mushaarka aad soo gudbisno waxaa laga soo hubinayaa meesha aad ka shaqeyso warbixinta ay u gudbiyaan Department of Workforce Development, The Internal Revenue Service, Social Security Administration, Unemployment Insurance Division, and Department of Transportation (Waaxda Horumarinta Shaqaalaha. Hay'adda Canshuuraha, Ceymiska Hawlgabka Dadweynaha, Ceymiska Shaqada, iyo Waaxda Gaadiidka) ayaa lagala xiriiri kara dakhligaaga iyo hantidaada.

DIGNIINTA GANAAXA FOODSHARE

Qof kasta oo ka mid ah qoyskaaga oo si ulakac ah u jebiya sharciyada soo socda waxaa laga joojinayaa FoodShare ilaa 12 bilood danbiga ugu horreeya, 24 bilood danbiga labaad ama marka ugu horreysa ee lagu qabto mukhaadaraad, iyo marka saddexaad oo laga mamnuuco barnaamijka oo dhan.

- Sheegashada ama macluumaad khaldan ama qarinta macluumaad lagu helo cuntada FoodShare.
- Ka-ganacsiga, iibinta, ama xadidda cuntada FoodShare.
- Isticmaalidda FoodShare oo lagu iibsado wax aan cunto ahayn, sida tubaakada, hub, xabbado ama wax qarxa.
- Dibu-iibinta cunto lagu soo iibsaday FoodShare.
- Lacag in lagu beddesho cuntada FoodShare.
- Isticmaalidda cuntada FoodShare, kaarka aqoonsiga, ama dukumiintiyo kale oo uu qof kale leeyahay.

Iyada oo ay ku xiran tahay heerka manaafacaadka dadku sida xun u isticmaalo, ayaa waxaa ganaaxu gaari karaa ilaa iyo \$250,000, xarig ilaa iyo 20 sano, ama labadaba. Maxkamad ayaa kaa joojin karta FoodShare muddo gaareysa ilaa iyo 18 bilood. Si joogta ayaa lagaaga mamnuucayaa FoodShare haddii lagugu xukumo inaad si khaldan u adeegsatay \$500 ama ka badan. Kuma soo noqon kartid FoodShare 10 sano haddii lagugu helo hadal ama metalaad been-abuur ah oo aad ku dooneysay aqoonsi iyo dad aan kula degganeyn in aad ku hesho cunto badan isku mar. Danbiileyaasha la raadinayo iyo kuwa ku jira tijaabin/ku xadgubay tijaabintooda ma heli karaan FoodShare. Waxa kale oo dadka dhaca cuntada lagu qabto lagu eedeeyn karaa danbiyo kale oo ah kuwa federaalka.

Haddii aad FoodShare ka ganacsato (ku iibiso ama ku iibsato) mukhaadaraad/daroogo sharci darro ah, marka kuugu horreysa ma heleysid FoodShare muddo laba sano ah, laakiin marka labaad waxaad noqoneysaa mamnuuc. Haddii aad FoodShare ka ganacsato (ku iibiso ama ku iibsato) hub, xabbado ama waxyaabo qarxa, FoodShare waa lagu diidayaa oo waxaad noqoneysaa mamnuuc.

RE: Federal Regulations Wisconsin Statutes	7 CFR 272, 7 CFR 273, 7 CFR 274, 946.92 7 U.S. Code §2024
---	---

Warbixinta Takoor La'aanta

Si waafaqsan sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo Maraykanka. Waaxda Beeraha (USDA) shuruucda xuquuqda madaniga ah iyo xeerarka, USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qayb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucay ku takoorida ku salaysan isirka. midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajal maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada (Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh nafo hadalka ah waxay kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo gubiyo cabashada takoor la'aanta, buuxi foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA, (AD-3027) oo onlayn lagaga helo: [How to File a Complaint](#), iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama qor warqad ku socota USDA oo warqadda ku bixi dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac **(866) 632-9992**. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: program.intake@usda.gov

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay